

Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka

CareOregon iyo Qorshaha Ganacsiga ee SCAN

[Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka](#) (HCMO) barnaamijkiisu wuxuu dib u eegid ku sameeyaa qorsheyaasha ganacsiga ee daryeelka caafimaadka, sida isku darka shirkadaha kala duduwan ee ganacsiga iyo helitaannada ganacsiga, si loo xaqiijiyo inaysan dhibin dadka iyo bulshooyinka ku sugan Oregon. Janaayo 12, 2023, Maamulka Caafimaadka ee Oregon (OHA) wuxuu aqbalay ogeysiis [dhammaystiran oo ah wax kala iibsiga ama isweydaarsiga waxyaabaha](#) ee ka socda Kooxda SCAN iyo CareOregon. Ogeysiisku wuxuu sheegaa qorsheyaasha loogu tala galay shirkaduhu inay isku darsamaan.

Yaa ku lug leh?

CareOregon waa shirkad aan faaiido doon ahayn oo siisa faaiidooyin caafimaad dadka u diiwaan gashan qorshaha caafimaadka ee Oregon Health Plan kuwaasi oo ku sugan degmooyin badan oo ay ku jiraan Clackamas, Clatsop, Columbia, Jackson, Multnomah, Tillamook, iyo degmooyinka Washington. CareOregon waxay ka shaqeysaa Jackson Care Connect iyo ururrada ay xiriiriso Columbia Pacific ee daryeelka waxayna siisaa adeegyo maamul shirkada Health Share of Oregon. CareOregon waxay sidoo kale bixisaa daryeel caafimaad oo guryaha lagu bixiyo iyo adeegyada caafimaadka ee dadka aadka u buka. Shirkadu waxay u adeegtaa in ka badan 500,000 oo qof oo ku sugan Oregon.

SCAN Group waa urur aan faaiido doon ahayn oo daggan California kaasi oo bixiya qorsheyaasha caafimaadka ee Medicare Advantage. SCAN Group waxay sidoo kale ka shaqeysaa kooxo caafimaad oo saddex ah waxayna siisaa daryeel caafimaad iyo adeegyo taageero dadka waayeelka ah iyo dadka aan haysan guryo sugan. Ururku wuxuu u adeegaa in ka badan 270,000 oo qof oo ku kala sugan gobollo kala duduwan.

Wuxuu qorshuhu ku saabsan yahay

SCAN Group iyo CareOregon waxay rajeynayaan inay abuuraan urur aan faaiido doon ahayn oo u adeega xubnaha Medicare iyo Medicaid ee ku sugan gobollo badan. Qorshaha la dejiyay, SCAN Group waxaa inta magaca laga baddalo loo bixin doonaa HealthRight oo CareOregon waxay bixin doontaa \$120 milyan si ay u noqoto shirkad hoos timaada HealthRight. CareOregon ma fileyso wax isbaddalo ah inay ku imaan doonaan adeegyada haatan la bixiyo iyo qorsheyaasha si loo sii wado maareynta haatan jirta iyo shaqaaleysiinta dadka. Ka hor intaan heshiiska la galin, CareOregon waxay ku tabaruci doontaa \$25 milyan si loo abuurro hayad samafal si ay ugu adeegto dadka ku sugan Oregon.

Maxaa xiga?

OHA wuxuu dib u eegid buuxda ku samaynayaa heshiiska si loo fahmo sida uu u saamayn doono bulshooyinka ku sugan Oregon. Inta dib u eegidu socoto, OHA waxaa uu isticmaali doonaa macluumaadka daryeelka caafimaadka, wararka iyo warbixinada warbaahinta, xogta laga helo shirkadaha, iyo afkaarta dadweynaha si go'aan looga gaaro bal in heshiiska la ansixiyo iyo in kale. Kadib markii la dhammeeyo dib u eegid, HCMO waxuu soo jeedin doonaa talo bixin ku saabsan in heshiiska lagu sii soconayo oo la meel marinaayo iyo in kale. Heshiiska ayaa sidoo kale waxaa dib u eegid ku samayn doona barnaamijyada gobolka ee wax xakamaynta.

Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka

Waxaan dooneynaa inaan adiga rayigaaga maqalno!

Fikradaha dadweynaha ayaa muhiim u ah dib u eegidda OHA! Jawaabcelintaada ayaa naga caawin karta inaan fahano sida heshiiskaan uu u caawin karo ama dhib ugu geysan karo dadka bulshadaada. Si aad noola wadaagto fikradahaaga iyo jawaabcelintaada ku saabsan heshiiskaan, fadlan iimayl noogu soo dir hcmo.info@oha.oregon.gov. Iimaylka aad soo qoreyso gudahiisa kusoo dar ereyga “CareOregon”, waxa ay kula tahay, iyo inaad taageereyso ama ka soo horjeedo

Dukumintigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid oo lacag la'aan ah. Noogu soo hagaaji iimayl hcmo.info@oha.oregon.gov ama noo soo dir taleefanka nambarkiisu yahay 503-385-5948. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.

Haddii aad qabto wax suaalo ah oo ku saabsan warbixintaan ama aad jeclaan lahayd inaad codsato xog dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir hcmo.info@odhsoha.oregon.gov.

heshiiska. Waxaad sidoo kale [isu diiwaan galin kartaa](#) inaad hesho xogo cusub oo ku saabsan dib u eegidaan.